

Year 1 Macluumaadka Hubinta Baaritaanka Tirada

Macluumaadka loogu talagalay
xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta



Waa maxay Year 1 ka Hubintra Baarintaanka Tirada?

Year 1 Hubinta Baarintaanka Tirada ka (Year 1 Number Screening Check) waa qiimeyn gaaban oo gobolka oo dhan ah oo u sheegaysa macalimiinta sida ilmahaagu uu ugu horumarayo dareenka hore tirada. Baaritaankan hubinta wuxuu dusha kala socdaa sida ilmahaagu uu u garanayo lambarada, lambaradu siday isugu xigaan, tirinta, isbarbardhigida iyo kudar iyo ka jar.

Ilmahaagu wuxuu la fariisan doonaa macalin waxaana la weydiin doonaa inuu ka jawaabo qiyaastii 30 su'aalood. Hubintu caadi ahaan waxay qaadanaysaa **10 ilaa 15** daqiiqo. Year 1 Number Screening Check si taxadar leh ayaa loo sameeyey si ayna culeys u ugu noqon ilmahaaga. Haddii ilmahaadu uu ku dhibtoonayo macalinku wuxuu joojin doonaa hubinta.

Ujeedada ugu weyn ee Year 1 Number Screening Check waa in la siiyo macalinka ilmahaaga macluumaad u ogolaanaya inay qorsheeyaan waxbarashada ilmahaaga. Dhammaan carruurta Year 1 ka si shakhsi ahaan ayuu u qiimeynayaa macalinku.

La xiriir dugsigaaga haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan Year 1 Number Screening Check.

Waa maxay micnaha tiradu?

Micnaha tiradu waa awooda lagu fahmayo, xiriirinayo, oo si wax ku ool ah loogu shaqeynayo lambaradaas si looga qaybgalo nolol maalmeedka oo aduunka micne u sameynaya. Carruurta qaarkood waxay kala kulmaan macnaha tirada wax loolan leh, saa daraadeed waa muhiim in carruurtan si dhakhso ah loo garto. Sidaan, macalimiintu waxay ku qorsheyn karaan taageero kasta oo khaas ah oo laga yaabo inay u baahdaan.

Waa maxay michana tiradu muhiimka u tahay?

Aas aas wanaagsan oo micnaha tirada ah wuxuu taageerayaa ilmahaagu inuu fahmo fikrado intaa ka sii badan oo xisaabeed adagna sannadaha dambe ee dugsiga hoose/dhexe iyo dugsiga sare.

Adeegga turjumaanka taleefanka

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjumaanka inuu dugsiga la xiriiro, fadlan ka wac 131 450, u sheeg xiriiriyaha luuqadaad dooneysid oo u sheeg inay wacaan dugsiga. Xiriiriyaha ayaa khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan wax lagac ah lagaama qaadi doono.